NATIONAL INSTITUTE
FOR HEALTH AND WELFARE

Talaalka ka hortagga qaaxada (BCG)

Qoraalkani wuxuu ka sheekaynayaa talaalka BCG. Ilmihiinna waxaa la siinayaa talaalka BCG, sababtoo ah talaalku wuxuu ilmaha ka badbaadinayaa cudurka qaaxada.

Waa maxay talaalka BCG?

Talaalka BCG waxaa ku jira bakteeriyada tuberkuloosiga oo nool oo awoodooda la diciifiyey. Bakteeriyada talaalka ku jirtaa waxay ilm aha ka caawinaysaa, in ilmaha jirkiisu samaysto unugyo (immuniteetti) ka difaacaya cudurka qaaxada. Talaalka BCG wuxuu ilmaha yhar yar ka badbaadinayaa cudurka qaaxada noocyadeeda khatarta ah. Noocyada khatarta ahi waa infakshanka ku dhaca xuubka maskaxda (aivokalvotulehdus) iyo qaaxada soo badatay. Qaaxada soo badata bakteeriyada keenta oo la yiraahdo tuberkuloosi ayaa si tartiib tartiib ah waxay ugu fidda meel walba o ka mid ah xubnaha qofka.

Waa maxay qaaxadu (tuberkuloosi)?

Qaaxadu waa cudur khatar ah oo la kala qaado. Cudurka qaaxada waxaa keena bakteeriyo la yiraahdo tuberkuloosi. Inta badan bakteeriyada tuberkuloosiga waxaa lagu arkaa sambabada. Laakiin waa suuragal, in lagu arko xubnaha kale ee jirka, sida lafaha, qanjirada dheecaanka, maskaxda iyo kelyaha. Sida caadiga ah qaaxada waa la daaweyn karaa oo waa laga raystaa, laakiin daaweynteedu wakhti dheer bay qaadataa.

Sidee bay qofka qaaxo ugu dhici kartaa?

Qaaxada waxaa laga qaadi karaa, qof qaaxo qaba quficiisa. Markuu qofka qaaxada qabhaa qufaco, agagaarkiisa wuxuu ku faafinayaa bakteeriyada tuberkuloosiga ee qaaxada keenta. Haddii qof caafimaad qaba neefta uu qaadanayo ay bakteeriyadu u raacdo, waxaa suuragal ah in qofkaasi qaado cudurka qaaxada. Sambabadiisa waxaa ku samaysmaya meelo infakshan leh, halkaas oo ay bakteeriyada ku jirtaa ku faafi karto xubnaha kale ee jirka. Sida caadiga ah qaaxada waxaa la kala qaadaa, haddii muddo dheer meel lala joogo qof cudurka qaaxada qaba. Laakiin ilmaha yar yar si sahlan bay qaaxada qof kale uga qaadi karaan. Qiyaastii tobankii qof ee qaaxadu ku faaftaba, hal ka mid ah buu cudurku ku dhacaa.

Waa maxay sababta ilmahayga loo siinayaa talaalka BCG?

Dhammaan ilmaha yar yar ee dhashay ee la kulmi kara khatarta ah inay qaaxo ku dhacdo, Finland waxay siisaa talaalka ka hortagga qaaxada ee la yiraahdo BCG. In ilmaha ay qaaxo ku dhici karto, khatarteedu waxay sii badataa, haddii

- ilmaha hooyadii ama aabbihii ama walaalihiis ama qof kale oo guriga kula nool, hadda ka hor laga helay cudurka qaaxada,
- haddii ilmuhu ama hooyadii ama aabbihii ama walaalihiis ama qof kale oo guriga kula nool uu ku dhashay waddan cudurka qaaxadu ku badan tahay,
- haddii uu sannadka ugu horeeya ee noloshisa uu muddo hal bil ka badan ku maqnaanayo waddan cudurka qaaxadu ku badan tahay.

Meelaha cudurka qaaxadu ku badan tahay waxaa ka mid ah waddamada Afrika iyo Aasiya intooda badan, Koonfurta Ameerika inteeda badan, Ruushka iyo waddamada Baltiga.

Xaggee talaalka lagu mudaa?

Laga bilaabo bisha Sibteembar 2006 bilowgeeda talaalka BCG waxaa lagu mudayaa gacanta bidixda cududeeda. Adduunka oo dhan talaalka waxaa lagu mudaa cududa, inkastoo hada ka hor Finland talaalka lagu mudi jirey bowdada bidixda.

Talaalku cillado dhibaato leh ma leeyahay?

Talaalka BCG meesha lagu mudo waxaa ku samaysma wax fin oo kale ah, inta badanna waxaa yara weynaada qanjirka ugu dhow meesha talaalka lagu mudey. Finka ku samaysma meesha talaalka lagu mudey, wuu dilaacaa, muddo dhowr todobaad ahna dheecaan baa ka yimaadda. Meeshana nabar bogsoodey baa ku samaysma. Arrintanina waa wax caadi ah oo talaalku leeyahay.

Sannadkii 2002 ayaa talaalka BCG oo muddo dheer la isticimaali jirey la joojiyey, sababta loo joojiyeyna waxay ahayd hay'addii talaalka samayn jirtey ayaa talaalka samayntiisa joojisey. Hadda waxaa la dareemay, in talaalka cusub uu ka cillado badan yahay kii hore ee la isticimaali jirey. Hase yeeshee talaalka hadda Finland laga isticimaalaa waa nooca keliya ee talaalka BCG ah ee hadda Yurub laga helo.

1000 ilmo ah ee la siiyo talaalka BCG, 1-2 ka mid ah ayuu talaalku Finland u keenaa in qanjirka ku jira meesha lugtu ka laabanto (nivustaipeen imusolmukepaise) soo baxo. Inta badan qanjirku inuu soo baxay waxaa la arkaa, marka wakhtaga talaalka ay ka soo wareegto 3-7 bilood. Qanjirkan soo baxayaa ma aha wax u baahan daweyn, mana keeno wax cillad ah oo khatar leh. Marka talaalka lagu mudo cududa, qanjirka mararka dhifka ah soo baxaa wuxuu ka soo baxaa kilkisha ama godka kalxanta.

Cilladaha ugu khatarsan ee talaalka BCG leeyahay waa infeshanno lagu arko meelo ka fog meesha talaalka lagu mudey. Kuwaas waxaa ka mid ah infakshan lafaha ah, infakshan kalagoysyada ah, infakshan maqaarka ah iyo infakshanka guud ahaaneed ee BCG. Cilladahan khatarta ah waa dhif oo100 000 ee ilmo ah ee la talaalaba 14 ka mid ah baa cilladahan khatarta ah lagu arkaa.

Infakshanada fog (Etäisinfektiot) waxaa la daaweeyaa iyadoo la isticimaalayo daawooyinka qaaxada. Infakshanka kalagoysyada iyo lafaha ee talaalka BCG keeno qayb yar oo ka mid ah ayaa waxay keenaan cillad joogta ah. Infakshanka fog waxaa celcelis ahaan la dareemaa markay wakhtiga talaalka ka soo wareegto 14 bilood.

Sidee baan u qiyaasi karaa faa'iidada uu talaalka BCG ilmahayga u leeyahay iyo cilladda uu u keeni karo?

Ilmaha ka tirsan kooxda khatarta leh, 10 -15 mar bay khatarta ah inuu qaado jirada qaaxadu ka bdan tahay tan ilmaha kale. Ilmahaasi faa'iidada uu talaalka ka helayo ayaa ka badan cilladda uu talaalku u keeni karo. Aqoonyahanadu waxay soo jeediyeen, in talaalka BCG la siiyo ilmaha ka tirsan kooxda ay khatar u tahay inuu cudurka qaaxadu ku dhaco. Hase yeeshee talaalku khasab ma aha oo qofkii raalli ka ah uun baa la siiyaa.